

# **Yeynu Nahay**

Guddiga Xiriirkha Shaqaalaha Qaranka (NLRB) waa wakaalad fadaraal madax bannaan oo la sameeyay 1935-kii waxayna siisay awoodda ay ku ilaalso xuquuqda shaqaalaha si ay isku abaabulaan, ula falgalan midba midka kale si ay u raadiyaan xaalado shaqo oo ka wanaagsan, doortaan in la yeesho wakiil gorgortan wadareed iyo in kale iyagoo ku hadlaya magaca shaqo bixiyaha, mise ka waantoobaan inay sidaas sameeyaan. NLRB waxay sidoo kale u shaqaysaa si ay uga hortagto oo ay u xaliso dhaqamada shaqada ee aan caddaaladda ahayn ee ay sameeyaan loo iyo ururada shaqo bixiyayaasha, iyo sidoo kale qabashada doorashooyin qarsoodi ah oo khuseeya matalaada ururka. NLRB waa wakaalad laba geesood ah oo ay maamusho hal dhinac oo ay maamulaan guddi shan qof ah iyo dhinaca kale oo uu maamulo lataliye guud. Xubnaha Guddiga iyo Lataliyaha Guud waxaa magacaabaya Madaxweynaha marka uu oggolaado Golaha Guurtida. Waajibaadka iyo shaqada Hay'adda ee hoos timaada Xeerka Xiriirkha Shaqaalaha Qaranka ee 1935-kii, ee wax kabaddalka lagu sameeyay, waxaa fulinaya Guddigaa Xiriirkha Shaqaalaha Qaranka iyo Lataliyaha Guud ee Hay'adda, kuwaas oo marka laga soo tago awoodaha madaxa bannaan ee hoos yimaada xeer hoosaadka, fulinaya awood kale oo ay ka helaan Guddiga.

---

## **Guddiga**

Guddiga waxay leeyihiin shan xubnood oo ugu horrayn waxay u shaqeeyaan sidii hay'ad garsoor ka dhigan go'aan kagaarista kiisaska ku salaysan diiwaannada rasmiga ah ee dacwadaha maamulka. Xubnaha Guddiga waxaa magacaaba Madaxweynaha muddo ah 5-sannadood, ogolaanshaha Golaha Guurtida, muddada hal xubin ayaa dhammaanaysa sannad kasta.

## **Qaybta Garsoorayaasha**

Garsoorayaasha Sharciga Maamulka NLRB waxay diiwaan galiiyen, maqlaan, dajiyaan oo go'aan kagaaraan kiisaska ku dhaqanka shaqada ee aan caddaaladda ahayn ee dalka oo dhan, iyagoo isticmaalaya xafiisyada Washington, New York, iyo San Francisco.

## **Lataliye Guud**

Lataliyaha Guud, oo uu Madaxweynuhu u magacaabay muddo 4-sanadood ah, waa kamadax bannaanyahay Guddiga wuxuuna masuul kayahay baaritaanka iyo dacwad kuqaadidda kiisaska kudhaqanka shaqada ee aan caddaaladda ahayn iyo kormeerka guud ee xafiisyada gudaha NLRB ee habaynta kiisaska.

## **Kormeeraha Guud**

Wax badan ka baro Xafiiska Kormeeraha Guud

## **Taariikhdeenna**

Guddida Xirirkha Shaqaalaha Qaranka waxay ku faantaa taariikhdeeda dhaqangalinta Xeerka Xirirkha Shaqaalaha Qaranka. Laga bilaabo Great Depression iyo sii socdkii Dagaalkii Labaad ee Adduunka iyo sare ukaca dhagaalaha iyo caqabahdahii xigay, NLRB waxay ka shaqeysay dammaanad qaadista xuquuqda shaqaalaha si ay u wada gorgortamaan, haddii ay doortaan inay sidaas sameeyaan. Hoggaan

## **Jaantuska Ururka**

Jaantuska Ururka NLRB

## **Kubbiir Kooxda NLRB**

## **Ogaansho**

Hordhaca Macluumaadkan waxaa loo diyaariyey in lagu caawiyo ganacsiyada daneynaya inay ka iibiyaa alaabtooda iyo adeegyadooda Guddiga Xirirkha Shaqaalaha Qaranka (NLRB). Warqaddan waxay faahfaahinaysaa qaabka wax iibsiga iyo siyaasadda guud ahaan lagu dabbakhi karo iibka ay qabato NLRB. Dukumeentigani wuxuu si guud ahaan u sharaxayaa noocyada alaabta la soo iibsaday, cidda soo iibisa iyo halka laga soo iibsado. Macluumaadka sida gaar ah loogu jiheeyo kuwa yaryar, ee aan faa'iidada lahayn, kuwa naafada ah ee adeegga naafada ah ee ay leeyihiin ganacsiyada yaryar ee halyeyga, iyo ganacsiyada ay haweenku leeyihiin ayaa sidoo kale lagu daray.